

HORAY UGU CODAY WARQADDA **VOTE** CODBIXINTA MAQANAHA **2016**

Gobolka Minnesota, khasab ma aha in aad sugtid ilaa Maalinta Doorashada—horay ugu coday warqadda codbixinta maqanaha!

HORAY U CODAY QOF AHAAN

Waxaad warqadda codbixinta maqanaha ku ridi kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo 46 maalmood ka hor Maalinta Doorashada. Booqo mnvotes.org si aad u ogaatid saacadaha iyo goobaha.

HORAY U CODAY ADIGOO BOOSTA KU SOO DIRAYA

Waxaad kaloo codsan kartaa in warqadda codbixinta laguugu soo diro boostada. Waa in aad warqadda codbixinta soo celisaa ugu dambayn Maalinta Doorashada.

① Ka codso warqad codbixin waqti kasta mnvotes.org. Saraakiisha doorashadu waxay soo diri doonaan qalabka codbixinta marka waraaqaha codbixinta la helo (taariikhaha gadaal ka eeg).

② Si taxadar leh u akhri tilmaamaha la socda warqaddaada codbixinta! Warqaddaada codbixinta lama tirinayo haddii aadan buuxin dhammaan foomamka.

③ Waxaad u baahan doontaa markhaati marka aad dhamayso warqaddaada codbixinta. Markhaatigu wuxuu noqon karaa codbixiye ka diiwaangashan Minnesota ama nootaayo. Markhaatigaagu waa in uu saxiixaa baqshadda saxiixa uuna ku qoraa cinwaankooda.

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
(Office of the Minnesota Secretary of State)
mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

TAARIIKHAHA 2016

DOORASHADA AASAASIGA
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

MAQNAANSHO KU CODAY
Coday adoo boosta ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 23ka Bisha 9aad (September) ilaa 7da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO
Horay isudiiwaangeli ugu dambayn 18ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA
Talaado, 8da Bisha 11aad (November)

HORAY UGU CODAY WARQADDA **VOTE** CODBIXINTA MAQANAHA **2016**

...ka timid horay

④ Haddii aadan u diiwaangashanayn in aad cod bixiso, waxaad heli doontaa arji isdiiwaangelin oo ku dhex jira qalabkaaga. Si aad isudiiwaangelisid, tus qofka markhaatiga kuu ah mid ka mid ah aqoonsiyada ku taxan tilmaan bixinada. Markhaatigaagu waa in uu ku calaamadeeyaa baqshadda saxiixa aqoonsiga aad tustay.

⑤ Markaad dhamaysid kadib, isla markaba dib boosta ugu soo celi warqadda codbixinta iyo foomamkaba. Warqaddaada codbixinta la ma tirinayo haddii ay timaado Maalinta Doorashada ka dib.

LA SOCO WARRQADDAADA CODBIXINTA

Dhammaan waraaqadaha codbixinta maqanaha ee soo gaaray xafiiska doorashada foomamkana loo soo buuxiyay si sax ah ayaa loo tirin doonaa. Booqo mnvotes.org si aad ula socota meesha xaalka warqaddaada codbixintu marayso iyo si aad u xaqiijiso in la helay lana tiriyay.

TAARIIKHAHA 2016	DOORASHADA AASAASIGA	Doorashada Guud
Warqadaha codbixinta waxaa la dirayaa laga bilaabo	Jimce 24ka Bisha 6aad (June)	Jimce 23ka Bisha 9aad (September)
Waxaa lagugula talinayaa in aad codsato ka hor	Jimce 8da Bisha 7aad (July)	Jimce 7da Bisha 10aad (October)
Warqadda codbixinta waa in la helaa ugu dambayn	Maalinta Doorashada Talaado 9ka Bisha 8aad (August)	Maalinta Doorashada Talaado 8da Bisha 11aad (November)

*Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
(Office of the Minnesota Secretary of State)*

mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

Bisha 3aad
(March) 2016